

# Badbaadada Korontada

Ku dhajinta nal daariska. Gelinta Kafee sameeyaha. Jaajarka laabtoobka kumbiyuutarka. Kuwaan waa dabiicigeena labaad inteenaa badan. Korontada waxay ka dhigtaa nolosheena mid sahlan. Si kastaba, waxaan u baahannahay in aan ka taxadarno iyo badbaadada maskaxda ku haayno.




## TALLOOYINKA BADBAADADA

- » Hakuu sameeyaan shaqooyinka korontada oo dhan korontiiste u qalma.
- » Marka aad iibsaneysid ama badeleysid guri, hakaa eego korontiiste u qalma.
- » Kaliya geli hal qalab oo kululeyn markiiba (sida kafee sameeyaha, dubaha, marwaxada, iwm.) oo qeybta godka ah.
- » Qalabyada waaweyne (farintijeerada, qalajiyaasha, dhaqayaasha, jikooyinka, qaboojiyaasha, iwm.) waa in si toos ah loogu xiraa qeybta godka darbiga. Fiilooyinka iyo godoka waa in aan la isticmaalin.
- » Koronto damiyaha (AFCIs) waa nooc koronto damiyaha ee damiya korontada goorta xaalad halis ah ay dhacdo. Tixgeli in gurigaaga ay ku jiraan. Isticmaal korontiiste u qalma.
- » Isticmaal koronto damiyaha (GFCIs) si aad u yareysid halista maasada. GFCIs wuxuu damiyaa wareega korontada marka ay noqoto maaso halis ah. Waa in lagu xiraa guriga dhexdiisa qubeysyada, jikooyinka, garaashyada iyo qeybta dhulka. Dhammaan gododka korontada banaanka waa in lagu ilaaliyaa GFCI.
- » Tijaabi AFCIs iyo GFCIs hal jeer bishiiba si aad u hubisid in ay si ku haboon u shaqeynayaan.
- » Hubi fiilada korontada si aad u hubisid in aysan beeldareyneynin ama aysan hoos yaalin roogaga. Fiilooyinka korontada waxaa loogu talo galay isticmaal kumeelgaar ah. Hayso korontiiste u qalma ku dar gododka korontada oo badan si markaas aadan u isticmaalin fiilooyinka korontada.
- » Isticmaal nalal fudud ee u barbardhigma cabirka lagu taliyay nalka ama qalabka. Waa in ay jirtaa waraaq tilmaameyso cabirka ugu badan ee nalka isticmaali karo.

## XASUUSIN MUHIIM AH

Soo wac korontiiste u qalma ama milkiilaha gurigaaga haddii aad qabtid:

- Dhibaatooyin joogta ah ee gubashada fayuuusyada ama maaseynta dab damiyada
- Dareenka jiriricada marka aad taabatid qalab koronto
- Midib gudoonka ama gododka darbiga oo qandac ah
- Gubashada ama urka gubashada ee ka soo baxayo qalabka
- Maaseynta ama yaraanshada iftiinka nalaka
- Dhimbilaha fiilooyinka ka imaado



[www.nfpa.org/education](http://www.nfpa.org/education)



Ishaada Warbixinta BADBAADADA | Qeybta Waxbarashada Bulshada NFPA • 1 Batterymarch Park, Quincy, MA 02169